



## (Maaha qofka qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun qaraabada xiriiriya, laakiin kan qaraabada xiriiriya waa midka marka qaraabadiisu goyso xiriiriya)

Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay scw inuu yiri: (Maaha qofka qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun qaraabada xiriiriya, laakiin kan qaraabada xiriiriya waa midka marka qaraabadiisu goyso xiriiriya).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu scw wuxuu sheegay: In qofka buuxiyey xiriirinta qaraabada oo wanaajiyaa aanu ahayn qofka ixsaanka ku guda ixsaan kaliya. Balse kan dhab ahaan u xiriiriya ee si buuxda qaraabada u xiriiriya waa kan hadii qaraabadu goyso xiriiriya, hadii ay xumeeyaana u ixsaan fala.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3854>

